# Dags att Prata om
## Sexuella övergrepp mot barn

Somaliska



**Waxa wanaagsan in la ogaado waxyaalaha ku sabsan xadgudubka galmada**

# Ku sabsan xadgudubka galmada

Iswiidhan ayay dhamaan dadka ka yar 18 sanno ay yihiin carruur.

Xadgudubka galmadu waa qalad waana in la joojiyo. Waxa wanaagsan inuu qof kasta uu wax ka og yahay waxa ay tahay xadgudubka galmadu iyo noocyada caawimada la heli karo. Haddii aad aqoon u leedahay ayay ka dhib yartahay in lagu dhiirado in laga hadlo xadgudubka.

Dad badan ayaa muujiya inay yihiin qaar xanuunsanaaya haddii loo geystey xadgudubka galmada. Qaarna waxba ma muujiyaan xataa haddii ay xanuusanayaan. Waxa aad heli kartaa caawimo haddii laguu geystey xadgudubka galmada iyadoo aad markasta xaq u leedahay inaad ka hadasho waxa dhacay.

**Qofkastaa jidhkiisa ayuu xaq u leeyahay!**

**Xadgudubka galmo ayaa noqon karta waxyaalo kala duduwan:**

- Waxaad markasta odhan kartaa maya haddii uu qof rabbo inuu hab ku siiyo, ku dhunkado ama ku taabto.
- Waa adiga qofka go'aaminaaya waxa okey adiga kuu ah- ee ma aha qof kale.
- Qofka ka weyn 15 sanno ma aha inuu la sameeyo galmo qof ka yar 15 sanno.
- Waa danbi in qof kale lagu qasbo galmo
- Waxa aad xaq u leedahay inaad maya galmada ka tidhaahdo xataa haddii aad wada socotaan ama haddii aad hore galmo u sameyseen.
- Qofna ma aha inuu qaado ama fidiyo sawiro qaawen oo adiga ah haddii aad ka yar tahay 18 sanno
- Qofna ma aha inuu galmo ku gato lacag, alaab ama adeegyo. Iswiidhan waa danbi in la gato galmada.

# Shantii carruur ahba hal ayaa loo geystaa xadgudubka galmada

Qof kasta waxa loo geysan karaa xadgudubka galmada. Waxay ku dhici kartaa carruurata yaryar, carruurta waaweyn, dhowr iyo toban jirada iyo dadka waaweyn. Dadka qaar ayaa u rumeysan in gabdhaha uun loo geysto, laakiin ma aha sidaas.

Haddii adiga ay kugu dhacdey ayaanad kali ku aheyn. Shantii carruur ahba hal ayaa Iswiidhan loo geystaa xadgudubka galmada ka hor inta aanay gaadhin 18 sanno jir.


Waxa jira dad waaweyn oo xadgudub u geysta carruurta, laakiin qaar badan oo sameeya xadgudubka galmada ayaa ka yar 18 sanno jir. Dhowr iyo toban jiradda ayay inta badan qaar ay isku da' yihiin u geystaan xadgudubka galmada. Waxa uu noqon karaa wiil ama gabadh saaxiib wada ah ama qof saxiib ah, ama qof kale oo ay dhowr iyo toban jiraddu garanayaan. Waxa uu sidoo kale noqon karaa qof aan la aqoon kaas oo aanay dhowr iyo toban jiradu garaneyn.



Dusha lagama arki karro cida xadgudubka ku sameysay cida kale. Waa ay adag tahay in laga fikiro in qof wanaagsan oo dabeecad furfuran uu sameeyo xadgudub, laakiin sidaas ayay noqon kartaa.

# Marna ma aha adiga qaladkaaga

Xadgudubka kadib ayay qaar badan oo loo geystey dareemaan inay joojin kari lahaayeen. Waxay dareemi karaan inay qaladkooda aheyd maadaama oo ay sii joogeen. Waxa dareemi karaan inay qaladkooda aheyd maadaama oo aanay maya odhanin/dhihin ama aanay iska caabiyin. Laakiin marnaba ma aha qofka loo geytey qaladkiisa. Waa qofka cid waxyeelaysa qofka markasta qaldka sameynayaa.


Waxa aan wax badan ka fikiraa qaladka aan sameeyey, maxay aniga iigu dhacdey. Ma qaladkeygey aheyd?

# Waa ay adagtahay in la sheego

Marmarka qaar ayay carruurtu iyo dhowr iyo toban jiradu sameeyaan waxyaalaha aan loo ogoleyn inay sameeyaan marka loo geysanaayo xadgudubka galmada. Waxay noqon kartaa ilme yar oo raacay qof weyn inkastoo aan loo ogoleyn taas ama dhowr iyo toban jir khamri cabey oo sakhraamay. Waxay sidoo kale noqon kartaa da'yarta oo internedka soo galiyey sawiro qaaqaawan oo ay iyagu leeyihiin ama uu aaday meel aan loo ogoleyn inuu taggo.

Waxay ku sii adkaan kartaa carruurta iyo dhowr iyo toban jirada inay dadka waaweyn u sheegaan in xadgudub loo geystey, haddii xadgudubku uu dhacay xili ay sameynayeen wax aan loo ogoleyn inay sameeyaan. Markaas ayay dareemi karaan cabsi inay dadka waaweyn u sheegaan maadaama oo ay ka xanaaqi doonaan. Qaar badan oo carruurta u geysta xadgudub ayaa garanaaya in sidaas la dareemo. Waxay markaas ka faa'iideysanayaan taas si aanay carruurtu u sheegin.



Ma aha adiga qofka qaladka sameeyey. Iyadoo ay aad muhiim u tahay in la maqlo taas, maadaama oo ay dhibyartahay in la is canaanto. Iyadoo marba marka ay ka sii badan tahay inta jeer ee la maqlo in aanay qaladkaaga aheyn, ayay kolba kaga sii dhageysaa.

# Sirta

Sirahu waxay noqon karaan qaar farxad leh iyo xiiso leh. Laakiin siraha kaa dhigaaya qof niyad jabsan, cabsoonaaya ama xanaaqsan waa inaad ka hadashaa. Haddii uu qof ku yidhaa ma sheegi kartid ayay taasi qalad tahay!

Dhowr sanno ka hor ayaan sheegay. Markaas ayay sanado badan ka soo wareegtey iyadoo aan ka gudbey ayay haddana aheyd wax aan ku diiqadoonayo. Waxa aan dareemaayey sidii in aan hooyo been u sheegay. Iyadoo markaan ka hadlay ay isla markiiba wax ka wanaagsan aan dareemay.



# Ayaan la hadli karaa?

Waxa inta badan wanaagsan in laga hadlo, laakiin adiga ayaa dooranaaya haddii aad doonayso inaad ka hadasho iyo cidaad kala hadlaysoba. Waxa jira dad badan oo aad kala hadli karto. Waxa ay noqon kartaa qof qoyska, saaxiib, qof aad wada socotaan ama qof weyn oo la shaqeeya carruurta iyo da'yarta. Haddii aad ka hadasho xadgudubka ayaad heli kartaa caawimo iyo ilaalo.

Hooyo

Saaxiibad

Kurator
(qof ka shaqeeya dugsiga)

Aabo

Dhakhtar

Saaxiib

Dhakhtarka maskaxda

Macalin

Wiilka saaxiibka

Skolsköterska
(qof ka shaqeeya dugsiga)

Waxa jira qaar badan oo rabba inay dhageystaan!

Booliiska

Xarunta qaabliaada dhalinta
(ungdomsmottagningen)
(xarunta qaabilaada ee ay dhallinyaradu u taggi karaan wixii su'aalo ee ku sabsan jidhka, jinsiga, uurka, xidhiidhka iyo walaaca).

Socialsekreterare
(Adeega bulshada (Socialtjänsten ama soc) waxa ay masuul ka yihiin sidii ay u taageeri lahaayeen dhamaan cidkasta oo ku nool kamuunka haddii ay caawimo u baahdaan. Marka aad caawimo ka hesho daryeelka bulshada ayaad heli doontaa kaaliye bulsho kaas oo aad la hadli karto marka aad qabto su'aalo, u baahan tahay taageero ama tallo.)

Gudhman
(dhamaan carruurta iyadoo aanu waa-lidkood la socon Iswiidhan timaada waxa la siiyaa Gudhman kaas oo ka caawiya waxyaalaha dhaqaalaha, wax dheeraad ka sii eeg https://www.informationsverige.se/svenska/Sidor/Start.aspx)

# Wax dheeraad ah ku akhri af iswiidhish

- jagvillveta.se - Dhamaan waxkasta oo ku sabsan xuquuqdaada markafal  danbi dhaco.
- UngaBoj.se se - Macluumaad iyo caawimo loogu tallo galay da'yarta dhibanayaasha, markhaatiyada iyo qaraabada
- RFSLungdom.se - Ururka dhalinta khaniisiinta, dadka jinsigooda bedela iyo galmada noocyada kale leh.
- mucf.se/näthat-hat-på-nätet - Haggaha sharciga oo loogu tallo galay dugsiga dhexe iyo dugsiga sarre.
- intetillsalu.se - Macluumaad da'yarta lacagta la siiyo si loogu galmoodo ama galmada iskugu waxyeeleeya.
- SafeSelfie.se - Sawirada qaawan ee lagu faafiyo internedka.

Haddii aanad rabin inaad qof aad garaneyso la hadasho oo aanad rabin inaad danbiga soo dacweyso, ayaad su'aalo la weydiin karaa oo taageero la heli karaa iyadoo aanad is cadeyn.

- **Bris.se**
- **Bup.nu**
- **Tjejjouren.se**
- **Killfragor.se**
- **UMO.se**



- Wac 112 haddii ay arintu degdeg tahay. Wac tusaale ahaan haddii aad aragto xadgudub dhacaaya ama haddii uu ilme ku sugan yahay khatar degdeg ah.

- Wac 114 14 ama raadso qof booliis ah haddii aad rabto inaad danbi soo sheegto.

- Miyaad adiga ama qof saaxiib ahi u baahan yahay ilaalo ama taageero? La soo xidhiidh adeega bulshada ee kamuunkaaga.

Buugan yar waxa soo saarey Children´s Welfare Foundation Sweden iyadoo ay caawinayaan carruurta iyo da'yartu. Waxyaalaha la soo xiganayaa iyaga ayay ka yimaadeen. Qaarkood ayaa loo geystey xadgudubka halka aan kuwa kale waxba loo geysan.

# www.dagsattprataom.se

Halkan ayaad ka helaysaa macluumad ku sabsan xadgudubka galmadu ee carruurta